ReImagining Education During the Pandemic

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

Su'aalaha Badanka la Iska Waydiiyo Waxbarashada Isku Dhafka ee K-5 ee PPS

Dugsiyada Dadwaynaha Portland (PPS) waxay bilaabeen hannaanka ardayda fasalka loogu soo celiyo qaab isku dhafan kadib markii fasalada lagu qaadan jiray qaabka onlayn ah ee Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran (CDL) inta lagu jiray aafada COVID-19. Fadlan fiiri:

- Farriimaha ku socda qoysaska PPS
- Soo jeedinta ku socota Guddida Waxbarashada
- Tusaalaha kaltirsiga toddobaadlaha ah

Ayay u bannaan tahay inuu kaqaybqaato jadwalka isku dhafka?
Wakhtigani, kaliya ardadya K-5 ayaa awoodi doona inay kaqaybqaataan jadwalka isku dhafka.

Waxaanu ka shaqaynaynaa qorshayaal aanu ku ballaarinayno ikhtiyaarada waxbarista ee fool-ka-foolka ah oo kooban oo kale oo loogu talogalay ardayda dugsiyada dhexe iyo sare waxaananu rajaynaynaa inaanu wax badan ka sheegno arrintaas dhawaan.

Goorma ayey u bilaabmeysaa waxbarashada isku-dhafan jadwalkeedu qoysaska iyagu ardaydeeda u doortay inay qaataan waxbarashadani lagu qaadanayo fasalada iskuulada? (Waxaa La Cusbooneysiiyey Maarso 15)
Maalinta ugu horeysa ee bilaabayaan ardayda waxbarashada isku-dhafan:

- **Fasalada Xanaanada Caruurta ilaa fasalka 1aad(PK-1):** Khamiis, Abriil 1
- **Fasalada 2-5:** Isniin, Abriil 5
- **Dugsiga Dhexe, dugsiga sarre:** Todobaadka bisha Abriil 19

(Ogsoonow: Taariikhahani waxa sugayaa inay ansixiyaan Ururka Macallimiinta Portland iyo Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland)

Sidee qoysasku isku diiwaangalinayaan?
Qoysaska ardayda mutaystay waxay heleen xogururin Febraayo 12 kaasi oo lagu waydiiyey inay bixiyaan doorbidkooda, isku dhaf mise CDL. Jawaabahaagu waa muhiim sababtoo ah waxay naga caawinayaan inaanu ku salayno qorshaha dhanka shaqaalaynta, dariiqyada baska, cuntooyinka, iyo taageerooyinka kale ee muhiimka ah.

Wakhtiga kama dambaysta ah ee jawaabiddu waa Khamiista, Febraayo 25.

Waa maxay farqiga u dhexeeya qaabka isku dhafka ah iyo waxbarista fool-ka-foolka ah ee kooban (LIPI)?
Qaabka isku dhafka ah wuxuu la xiriiraa dib u furitaan baaxad leh ee dhismayaasha dugsiyada kuwaasi oo loo furayo ardaydeena K-5.

LIPI waa adeeg bartilmaameed leh oo aanu siinayno tiro yar oo ah ardayda K-12. LIPI waa qaab kambaska ka qabsoomaya oo ay taageerto Waaxda Waxbarashada Oregon oo loogu talogalay daboolidda baahiyaha kooxo gaar ah oo arday ah iyadoo laga duulayo taageerooyinka loo baahan yahay ee waxbarasho, xiriir, bulsho-dareen, manhaj, waxbariseed, iyo/ama qiimayneed.

Wakhtigan adeegga LIPI waa mid aanu bixino waxaananu sii wadi inaanu sidaas yeelno kadib marka la hirgaliyo qaabka isku dhafka ah ee K-5. Waxaanu sii wadnaa inaanu qorshayaal u samayno waxbarista isku dhafka ah ee dugsiyada dhexe iyo sare; maadaama ay jirto cakirnaanta la xiriirta kala fogaanshaha dadka, barnaamijyadani waxa suurtogal ah inay ka duwanaadaan kuwa waxbarista isku dhafka ah ee dugsiga hoose.

Maxaad u dooray wakhtigan?
Macallimiinteena K-5 hadda waxay awoodaan inay qaataan tallaalka, waxaananu doonaynaa in ardaydu ku laabtaan dhismayaasha dugsiyada isla markii ay sidaasi badbaado noqoto. Jadwalka Abriil si fiican ayuu ugu habboon yahay jadwalka tallaalka ee wakhtigan. Sidoo kale wuxuu noo saamaxayaa inaanu ardayda dib ugu soo celino kala-guurkii asalka ahaa ee sanad dugsiyeedka (u dhexeeya wakhtiyada dallacsiinta).

Waa maxay faa'idada ardayda ugu jirta inay kaqaybqaataan qaabka isku dhafka ah?
Ardayda, gaar ahaan ardaydeena yaryar, waxay ku fiican yihiin waxbarashada fool-ka-foolka ah marka loo eego CDL. Qaabka isku dhafka ah, macallimiintu waxay awoodi doonaan inay ardayda kooxeeyaan si ay si waxtar leh uga caawiyaan soo kabashada waxbarashada.

Ka waran ardayda ay qoysaskoodu doortaan inayna kaqaybqaadan qaabka isku dhafka ah?
Jadwalka ardayda doorta inay joogaan CDL waxba iska baddali maayaan kadib markii aanu bilawno qaabka isku dhafka. Macallimiinta ayaa go'aamin ardayda qaadan doona casharrada fool-ka-foolka ah subixi iyo kuwa qaadan doona gallinka dambe. Wakhtiga waxbarista tooska ah hadda waa 2.5 saacadood wuxuu noqon doonaa 2.25 saacadood marka aanu bilawno qaabka isku dhafka ah. Ardayda ku sugan labada qaabba waxay wali sii wadi inay kaqaybgalaan hawlaha casharrada onlaynka ku duuban qaarkood.

Haddii aanu dooranay inaan joogno CDL oo aanu jecelnahay inaanu u wareegno qaabka isku dhafka ah, sidaas ma yeeli karnaa?
Haa, waanu u oggolaan doonaa qoysaska inay baddalaan doorashada qaabka dugsiga ee ardaygooda kadib markii ay doorteen mid ama ka kale.

SU'AALAHA FASALKA

Siduu muuqaalka guud u ekaan doonaa?
Shaqaalaha hawlgallada PPS ayaa ka saaraya farnijarka dhismayaasha dugsiyada si ay u hubiyaan in fasaladu u diyaarsan yihiin qaab oggolaanaya in 6 fuudh u dhexeeyaan dadka. Ardayda iyo shaqaalaha galaya dugsiyada waxay ogaan doonaan tiro ah waxyaalaha cusub oo ay kujiraan:

- Boodhadh gaar ah iyo calaamado dhulka la marsho si loo hubiyo kala fogaanshaha dadka
- Meelaha ay yaalaan gacmo nadiifiyayaal
- Nidaamyo gaar ah oo sheegaya galitaanka iyo bixitaanka
- Gidaaro muraayado iyo waxyaalo kale ah
- Tirada miisaska oo la dhimo fasalada dhexdooda si loo joogteeyo kala fogaanshaha dadka (wuxuu doonayaa Gobolka Oregon inay noqoto 35 fuudh oo laba jibbaaran)
- Meel loogu talogalay ardayda ama shaqaalaha muujiya astaamo maalintii
- Nadiifin joogto ah ee meelaha sida badan la taabto

Miyey daaqaduhu furnaan doonaan inta ardaydu ay fasalka ku sugan yihiin?
La-taliyaheena nadaafaddu wuxuu muujiyey baahida loo qabo in hawadu ay wareegto dhismayaasha oo dhan inta ugu badan ee suurtogal ah. Furidda daaqadaha iyo ku soo kordhinta hawo-shaandheeyayaal, oo ay la socdaan hawlgalinta nidaamyada HVAC ee muddooyin dhaadheer, ayaa noqon doona tallaabooyin badbaado oo aanu raaci doono. Dadaaladani waxay si gaar ah muhiim u noqon doonaan barxadaha astaamaha iyo meelaha wareegga hawadu uu liito.

Muxuu noqon doonaa qaabdhismeedka qaabka isku dhafka ah?
Macallimiinta K-5 waxay u qaybin ardaydooda laba guuto – guuto subixii ah iyo guuto gallinka dambe ah. Guuto kasta waxay la qaadan waxbaris fool-ka-fool ah macallinkooda muddo dhan 2 saacadood iyo 15 daqiiqo maalmaha Isniinta, Salaasada, Khamiista iyo Jimcaha. Maalinta Arbacada waxay sii wadi inay raacaan qaabka Waxbarashada Onlaynka ah ee Dhammaystiran (CDL).

Markii ardayda qaabka isku dhafka ku jirtaa ayna dhismaha dugsiga joogin, waxay kaqaybgali CDL inta ka harsan maalinta dugsiga. Waxbarista fool-ka-foolka ah waxa lagu dhigan xisaabta, akhriska, iyo waxbarashada bulshada dareenka.

Miyaa macallinka ardaygayga la baddali doonaa muddada kala-guurkan?
Inta badan, macallinka ardaygaagu kii hore ayuu sii ahaan iyadoon la eegayn haddii aad doorato inaad kaqaybqaadato qaabka isku dhafka ama aad joogto CDL. Waxa jiri kara xaalado aanu macallinku ku soo laaban karin shaqada – waxaanu samayn doonaa dib u habayn oo aanu la xiriiri qoysaska annagoo u sheegayna xaaladahan.

Miyaa shaqaalaha dugsiga iyo ardayda kaqaybqaadanaya qaabka isku dhafka ah looga baahan doonaa inay xirtaan afsaab?
Haa, dhammaan shaqaalaha waxa looga baahan yahay inay xirtaan afsaab inta ay joogaan meelaha dadka kale joogaan ee dhismahooga. Ardayda leh IEP-yada ama qorshayaasha 504 kaasi oo ka hor joogsanaya xirashada afsaabyada waajib kuma aha. Xaaladaha noocan ah, shaqaalaha dugsiga waxa la siin doonaa qalabka ilaalinta qofka (PPE) oo dheeraad ah.

Miyaa shaqaalaha dugsiga looga baahan la tallaalo kahor intayna shaqadan fool-ka-foolka ah iman?

Maya, tallaalada COVID shaqaalaynta shardi loogama dhigo. Hase yeeshee, waxaanu ku dadaalaynaa in dhammaan shaqaalaha dugsiga sida ugu dhakhsaha badan loo tallaalo.

CUNTADA, GAADIIDKA

Siday quraacda iyo qadadu noqon doonaan ardayda wax ku dhiganaya qaabka isku dhafka ah?
Cuntooyinka way heli doonaan ardayda kaqaybqaadanaya qaabka isku dhafka ah.

Ardayda guuto kasta ka tirsan waxay heli doonaan quraac iyo qado markii ay dhismaha dugsiga ka baxaan. Cuntooyinka laguma dul cuni karo baska.

Miyaa adeegga cuntadu isbaddali doonaa ardayda aan kaqaybaaadan qaabka isku dhafka ah?
Ardayda aan kaqaybqaadan qaabka isku dhafka ah waxay awoodi doonaan inay ka helaan cuntooyinka goobo cunteedyo Adeegyada Nafaqada ah oo gaar ah.

Gaadiidka waxa dhici karta inaan la helin in ku filan si loo sii wado taageerada cuntada guryaha la gaynayo markii aanu u wareejino darawaladayada iyo basaska qaabka isku dhafka ah.

Waa maxay nidaamyada badbaadada ee diyaarsan si loo hubiyo basaska dugsigu inay badbaado u leeyihiin ardayda isticmaali doonta noocaas gaadiidka ah si ay dugsiga u aadaan?
Hubinta in ardaydayadu badbaado ku sugan yihiin inta ay basaska saaran yihiin waxay muhiim u tahay sida hubinta badbaadadooda inta ay dhismaha dugsiga joogaan.

Ardayda waxa loo fariisin qaab ardaygiiba hal kursi ku fariisanayo ama ay u dhaxaynayso qiyaastii 3 fuudh sida ay dhigayaan tilmaamaha ODE. Daaqadaha xagga hore ugu xiga iyo daaqadaha xagga dambe ugu xiga way furnaan doonaan si loo abuuro qulqulka hawada ee ugu fiican baska oo dhan. Sidoo kale basaska waa la nadiifin markii ay guuto qaadaanba.

MAWDUUCYADA KALE

Waalidka / mas'uulka ma codsan karaa in ardaydooda la galiyo koox gaar ah (subax ama galab) si looga caawiyo baahiyaha daryeelka ilmaha?
Maya, iskuulka ayaa go'aamin doona wada-shaqeynta. Waxaan ka shaqeyneynaa qorshe aan ku siineyno xanaanada daryeelka cunuga oo dheeraad ah qoysaska laga yaabo inay dhibaato kala kulmaan kooxda iskuulka ee ardaygooda la galiyay.

Haddii dhammaan qoysaska K-5 ay go'aansadaan inay doortaan inay ka qaybgalaan qaabka isku dhafan, PPS ma leedahay awood dhisme / meel deeqi karta tirada ardaydaas?
Haa, maxaa yeelay ardaydeena K-5 waxay wax ku bartaan meel fasal iska kooban, tani way suurtagali doontaa.

Ma jiri doonaan shaqaale ilaaliye dheeraad ah oo loo kireysto si ay uga caawiyaan nadiifinta inta u dhaxaysa kooxaxa?
Maya, ma jirto qorshe lagu kordhinaayo awoodda ilaaliyaha. Waxaan qorsheyneynaa inaan xadidno isticmaalka meelaha ka banaan dhismo iskuul kasta si aan u hubinno shaqaalaha ilaaliya hadda ee goobtaas inay awoodaan inay si fiican u nadiifiyaan una nadiifiyaan inta u dhexeysa Kooxaxa.